

# Gadashada daawooyinka ee Finland

1.2.2022

## Warbixintan kooban waxaa loogu talaggalay qaxootiga iyo dadka magangelyo-doonka ah ee aan haysan lambarka aqoonsiga qofka.

### Halkee ayaad daawo ka gadan kartaa?

Finland waxaa daawooyinka laga helaa farmashiyaha oo kaliya. Daawooyinku waa daawooyinka dhakhtarku qoro iyo daawooyinka uu qofku iskiis isugu daweyyo. Daawooyinka qoran waa daawooyinka uu dhakhtarku qofka u qoro.

Daawooyinka uu dhakhtarku qoray waxaad ka heleysaa oo kaliya farmashiyaha, marka aad tusto warqadda tilmaamaha bukaanka ee uu dhakhtarku ku siiyay.

Mararka qaar uma baahnid in aad lacag ka bixiso daawada uu dhakhtarku kuu qoray, waxaa laga yaabaa in ay tusaale ahaan dowladdu bixiso. Tusaale ahaan haddii aad deggantahay xerada qaabiliaadda qaxootiga, waxaad haddii loo baahdo heli kartaa warqadda ballanqaadka ee lagaaga bixinayo daawada laguu qoray.

Marka aad gadanayso daawada uu qofku iskiis isugu daweyyo, uma baahnid warqadda daawada lagu qoro. Daawooyinka qofku isku daweyyo waxaa laga iibsan karaa farmashiyaha oo kaliya. Daawooyinkaas laguma gado dukaamada caadiga ah. Daawooyinka uu qofku iskiis isugu daweyyo waa tusaale ahaan daawooyinka xanuunka qaarkood iyo boomaatooyinka daawada ah. Waxaa kale oo farmashiyaha laga helaa agabka daryeelka, tusaale ahaan agabka wax lagu duubo iyo qalabka xummadda lagu cabiro. Waa in aad adigu iska bixisa lacagta daawooyinka uu qofku iskiis isugu daweyyo iyo agabka daaweynta.

### U adeegista qof kale

Qof kale farmashiyaha wuu kaaga soo qaadi karaa daawada laguu qoray. U adeegista qof kale waxay suurageleysaa marka uu qof kale wado tilmaamahaada bukaanka ee warqadda ah. Haddii aad qof kale u adeegayso, waa in aad caddaysaa aqoonsigaada.

### Farmashiyaha waxaad ka heleysaa taloojin la xiriira isticmaalka daawooyinka

Farmashiyaha ayaa dadka lagu siiyaa taloojin la xiriira sida loo isticmaalo daawooyinka iyo agabka daryeelka.

Tilmaamaha isticmaalka daawooyinka uu qofku iskiis isugu daweyyo waxay ku qoran yihiin baakadda daawada.

Daawada dhakhtarku qoray waxaa sharooto lagula dhejiyay tilmaamaha isticmaalka daawada ee uu dhakhtarku bixiyay.

### Maxaa loola jeedaa beddelista daawada?

Farmashiyaha ayaa laguugu sheegayaa, haddii ay jirto daawo qolo kale samaysay oo lamid ah daawada laguu qoray, taas oo qiimo ahaan ka jaban tan laguu qoray.

Daawadan waxaad ka heleysaa farmashiyaha, haddii aanu dhakhtarku mamnuucin in la beddelo daawada.

Daawada ay qolo kale samaysay ee lamidka ah daawadaada laguu qoray waxaa ku jira maadada daawada laguu qoray ku jirta mid le'eg. Beddelista daawadu waa ammaan.

**Daryeelka daawadu wuxuu sida ugu fiican u hirgalaa, marka aad ogtahay arrimaha la xiriira daryeelkaada daawada. Si geesinimo leh u weydii arrimahan dhakhtarka iyo farmashiyaha.**



LUOTETTAVAN  
LÄÄKETIEDON  
PUOLESTA  
Lääkeinformaatioverkosto